

## Lacagta dhakhtarka

Caruurta waxay leeyihiin daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah ilaa inta ay 19 sano buuxinayaan. Laakiin kuma jirto daawadu, warqada cadeynta iyo talaal ka baxsan ka barnamijka talaalka carruurta ee qaranka.

### Booqashada dhakhtarka

Booqashada dhakhtarka ee rugta caafimaadka degmada	150:-
Booqashada guriga waxa lagu saari doono	0:-
Booqashada dhakhtarka rugta dhakhaatiirta heeganka ah	300:-
Booqashada dhakhtarka ee rugta cusbitaalka ama dhakhtar khaas ah oo gooni loo leeyahey takhasusna ah (dawladu mal galiso)	300:-
Booqashada kowaad ee dhakhtarka takhasuska ah ama gudbinta uu soo qoro dhakhtarka rugta daryeelka caafimaadku waa	150:-
Daryeelka caafimaadka ee maalintii ee dhakhtar ku jiro, cunto ku jirin	300:-
Telefoon wax ugu qorid/talo bixin dhakhtar	100:-

### Daaweynta daryeel caafimaad oo kale

Booqashada kalkaalisada ee rugta daryeelka, cusbitaalka iyo cilmi nafsiga	100:-
Telefoonka warqada daawada	100:-
Daryeelka hooyada iyo daryeelka caafimaadka carruurta	0:-
Booqashada dabiiba jidhka, dabiiba codka iyo hadalka, dabiibka shaqada dhakhtarka cilmi nafsiga iyo qaar kale oo badan	100:-
Tijaabinta qalabka la adeegsado	0:-
Daweynta koox ahaaneed, tusaale tabobarka dabaasha iyo jimicsiga wadnaha	50:-
Baadhitaanka sawirka raajada ee isla maalinta cusbitaalka wax kale loo booqanaayo	0:-
Baadhitaanka sawirka raajada ka dib markay rugta daryeelku kusoo gudbiso	150:-
Baadhitaanka sawirka raajada ka dib markuu dhakhtar takhasus ahi kusoo gudbiyo, aan aheyn isla maalintaa	300:-
Tijaabo qaadis, aan ka mid aheyn booqasho kale	100:-
Daryeelka bukaanka ee maalmeed, cuntadu ka baxsan tahey	100:-

### Qorsheyn/daaweynta aan cudur la xidhiidhin

Raajada naaska dumarka	200:-
Baadhitaanka tijaabada unugyada hoosta dumarka, hadii lagu yeedhay ka dib	100:-
Baadhitaanka tijaabada unugyada hoosta dumarka, hadaad adigu rabto	200:-

### Talaalada, warqada cadeynta iwm

Qiimuhu wuu kala duwan yahey iyadoo ku saleysan nooca talaalka iyo Warqada cadeynta ee ay khusayso. Dadka halista u ah hargabka- iyo talaalka bakteeriyada pneumokock waa u bilaashah.

## **Qiimaha kharashka daryeelka bukaanka ee maalintii**

Qado

54:-

Qado-fudud

39:-

## **Kharashka Cusbitaalka**

Hadii lagu dhigo cusbitaal, waxaad bixinaysaa 80 karoon maalintiiba. Taa waxay khuseysaa hadii adigu aad 20 sano tahey ama ka weyn tahey.

## **Kharash ka yar**

Hadii in badan oo joogto ah lagu daryeelo waa uu yaraaneyaa kharashkaagu laga bilaabo maalinta 91-naad

Hadii aad haysato in ka badan 100 cisho oo daryeel mudo 12-bilood ah, waxa lagu sii karaa kharash ka yar oo maalmaha daryeelka ee ku xiga.

Hadii dakhligaaga ama bisilkaagu ka yar yahey 80 000 kr sanadkii, waxa lagu siin karaa kharash ka hooseeya

Hadii aad ka yar tahey 40 sano iyadoo aad haysato aktivitetsersättning ama sjukersättning waxa lagaa dhimi karaa 30 cisho ee ugu horeeya markasta oo daryeel yimaado

Waa in aad adigu dalbataa dhimista kharashka. Waydiiso caawimo shaqaalaha daryeelka bukaanka.

## **Taas u bixi**

Waxa aad ku bixineysaa kaash ama kaadh hadaad rabto inaad ku bixiso faktuurad, waxa lagu saari 50 karoon oo kharashka faktuurada ah.

## **Xadeynta kharashka badan**

Ma bixineysid waligaa wax ka badan 900 oo karoon inaad ka bixisid daryeelka bukaanka muddo laba iyo toban bilood gudahood ah. Markaad bixiso kharashka 900 karoon ah ayaa kaadhka xorta ah lagu siineyaa. Waxaad ku darsan kartaa kharashka daryeelka deegaanka iyo kan rugaha gaarka loo leeyahey ee dawladu maal galiso. Waxa kale ood ku darsan kartaa kharashka aad ku bixisay daryeel bixiye ay dawladu maalgaliso ee deegaan kale.

Kharashka waxa aad gashan kartaa kaadhka qiimaha ugu sareeya. Adiga bukaan socodka ah ayay tahey masuuliyadaada in aad shaanbadeysato kaadhka iyo in aad ka war hayso marka aad gaadhey intii ugu badneyd ee 900 karoon.

Kuwani kuma jiraan kaadhka qiimaha ugu sareeya:

- Kharashka aad bixinayso marka lagu dhigey cosbitaal (daryeelka xidhan)
- kharashkaaga qalabka caawimada
- talaalada
- warqad cadeyn
- qorsheyn ama daaweyn aan cudur la xidhiidhin
- booqasho aad iman weyday

## **1800 daawooyinka ah**

Uma baahnid waligaa in aad ka bixiso daawadaada in ka badan 1800 karoon mudo laba iyo toban bilood gudahood ah. Markaad bixiso 1800 karoon waxa lagu siin kaadhka bilaashka ah.

Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 sano ee ka tirsan qoys isku mida ah waa ay isku xisaabsaneysaan qiimaha daawada.

**Daawooyinka waxaad bixin doontaa mudo laba iyo toban bilood ah:**

Isku geynta kharashka oo karoon ah	Qaybtaada boqolkiiba	Intaad bixineyso ugu badnaan oo karoon ah
-900	100 %	-900
900-1 700	50%	900-1 300
1 700-3 300	25%	1 300-1 700
3 300-4 300	10%	1 700-1 800
4 300-	0%	1 800

Wixii su'aalo ah, la xidhiidh farmasiiga.

**Hadii aanad imaan kareyn**

Hadii aanad imaan kareyn wakhtiga lagu qabtey waa inaad soo sheegto ugu yaraan maalin ka hor, si wakhtiga loo siiyo qof kale. Hadii aanad soo sheegin waa in aad bixiso lacagta dhakhtarka iyo 50 karoon oo dheeraad ah oo faktuurada ah.

**Hadii aad sugto**

Hadii aad sugto in ka badan 30 daqiiqo waxa inta badan lagu soo celin karaa lacagta dhakhtarka ee aad bixisay. La xidhiidh shaqaalaha daryeelka bukaanka- iyo caafimaadka.

**Hadii aan lagu daaweyn**

Hadii qaliinkaagi, badhitaankaagi ama daaweyntaadi lagu qorsheeyay la baajiyo waxa lagu siin karaa lacag celin kharashyada kaa baxey ah. Hadii uu dhaco shil weyn oo keena falal dagdeg ah oo aan la fileyn lacag celin laguuma sameynaayo.

**Xidhiidhka macaamiisha**

Miyaad qabtaa su'aalo ku sabsan faktuuraddaada? Xidhiidhka macaamiisha ee golaha deegaanku ayaad ka heli kartaa jawaabaha su'aalaha sameeya aalmo ka heli kartaa kaadhka qiimaha ugu sareeya iyo kaadhka xorta ah.

Waxa aad naga heli kartaa telefoonka. 0470-58 96 50.